

# Wargeyska Mountain View

## Maarso 15, 2017

Talaaldo, Maarso 4.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30, CLC  
Isniin, Abriil 10 - Jimco, Abriil 14.....Ma Jiro Dugsi, Fasaxa Guga (Spring Break)

### Fariinta Agaasimaha

Waxaan rabaa in aan u mahad celiyo qof kasta oo ka soo qeybgalay shirarka SEP. Runtii, tani waxay muujisaa sida aad uga fakartid caruurtaada. Waxaan idinkaga mahad celineynaa in aad ka soo qeybgasheen waxbarashada caruurtina. Waxaan rajeyneynaa in aad dhamaan qaadataan fursad aad uga qeybgashaan wareysiga ku saabsan dugsigena muddada aad halkaan joogtay. Macluumaadka ka soo baxa wareysiga waxaan u isticmaali doona horumarinta adeegga aan idin siino idinka iyo caruurtiina. Haddii aadan weli qaadanin fursadda ka qeybgalka wareysiga, fadlan kaalay, kaddibna waxaan kugu kaalmeyn doonaa in aad wareysiga ka qaadatdi kombuyutarka. Waad ku mahadsan tahay waxa aad ku soo biirisay. Waa wax aan qiimeynto.

### Dugsiga Ka Hor iyo Kaddib

Waxaan ogaanay in ay jiraan arday tiro badan oo horay u yimaada dugsiga kaddibna sii jooga dugsiga ilaa goor dambe. Waxaan halkaan ku aragnaa arday timaada 6:40, iyo qaar aan ka tagin dugsiga ilaa laga gaaro 4:00. Ma qabno kormeereyaal korka ka eega ardayda 7:30 ka hor, sidaas darteed waan ka walwanaa in waalidiinta iyo ardayda horay u yimaada dugsiga ama ka taga dugsiga goor dambe in ay ogsoon yahiin in aan bixin karin adeegyada xanaanada maalinta ee la siiyo ardayda horay u timaada ama ka taga dugsiga goor dambe. Waxaan qabnaa barnaamijkena maalinta fidsan iyo Shaybaarka Barashada (Learning Lab) ee barnaamijyo u sameyay ardayda, anaga oo ku faraxsan in aan bixino adeegyadaas. Hase ahaatee, ma awoodno in aan fiirino, kana noqono mas'uul ardayda iyo walaalaha jooga halkaan saacadaha ka baxsan dugsiga haddii aysan ku jirin barnaamijyadaas.

Waxaan ku dhiirigelineynaa ardayda iyo waalidiintooda in ay samaystaan qorshe ku saabsan meesha ay caruurta joogi doonaan iyo waxa ay samayn doonaan dugsiga ka hor iyo kaddib.

### Labbiska Ardayda

Waxaan aragnaa arday badan oo aan qabin labbiska dugsiga. Xasuusin ahaan, ardayda waa in ay soo qaataan labbis midabadiisu yahiin baluug, caddaan, iyo khaki. Waxaan dhawaan baddalnay labbiska si loogu darro baluugga culus. Waxaan kaloo ogolaanay isbaddal u ogolaada ardayda in ay soo qaataan labbis kasta oo mattala jaamacad. Waxaan xoogga saarnaa sida aan u yeelano hiddaaha kulliyadda. Waxaan rabnaa in ay ardayda isu arkaan sida ardayda jaamacadda mustaqbalka. Mountain View, waxaan soo dhaweyneynaa labbis kasta oo mattala kulliyadda ama jaamacadda maalin kasta oo ka mid ah todobaadka.

## **Waalidiinta iyo Macmacaanka**

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maalinta Talaadada, Maarso 28, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.